

Geerida

Hadii geeri guriga ama meel dadweynuhu leeyahey ku timaado la xidhiidh alaarmka SOS ta (112), rugta caafimaadka ama rugta dhakhaatiirta heeganka ah. Baadhitaan dhakhtar ayaa loo baahan yahey si loo sugo geerida iyo bixinta warqada cadeynta geerida iyo cadeyn sababta geerida. Hab dhaqan guud oo wadajir ah oo looga shaqeeyay gobalka Kronoberg iyo ciidamada booliiska ee deegaanka Kronoberg ayaa jira.

Hadii geeridu cosbitaalka ku timaado ama meel kale oo daryeelka waxa mar kasta jooga shaqaalaha daryeelka oo aad ula tagi karta su'aalaha imaan kara. Waxa markaa aad haysataa inaad markii ugu danbeysay sii nabad galyeyso. Dhow saacadood ka dib ayaa loo qaadi doonaa qolka maydka, halkaas oo labada cosbitaalba ay ku yaalaan qol cibaado.

Baadhista sababta dhimashada

Baadhista sababta dhimashada ayaa marmarka qaarkood noqon karta lagama maarmaan si loo sugo sababta geerida. Marmarka qaarkood waa muhiim si loo cadeeyo heerka cudurka joogay iyo si jawaab looga helo su'aalaha kala duwan ee qaraabada ama dhakhtarka daaweynaayey. Dhakhtarka ka masuulka ah ayaa kala hadlaaya qaraabada, qaliinka ka hor, kaas oo ay maamulaan xeerar iyo shuruuc.

Aaska iyo qaaditaanka qofka geeryoodey

Marka dhakhtarka aan joogin cusbitaalku sugo sababta geerida ama marka uu bukaan socodku ku geeryoodo daryeelka caafimaadka dhexdiisa ayay la soo xidhiidhayaan qaraabadu dadka aaska sameeya. Shaqaalaha daryeelka caafimaadku ayaa ka jawaabi kara su'aalaha. Dadka aaska sameeya ayaa qaabilsan qaaditaanka iyo talada ama gargaarka xiliga aaska. Waxa kale oo ay kaa caawin karaan talo bixin hadii geeridu ku timaado xili booqasho wadan kale ama hadii qofka geeryooday loo qaadaayo wadan kale.